

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_489/2023.

Date: -25/12/2023

KU: Mamulka Geo Sol

=Xarunta=

OG: Ku xigeenka duqa caasimada

=Xarunta=

OG: Xoghayaha dawlada hoose

=Xarunta=

OG: Duqa Caasimda Jsl

=Xarunta=

Ujeedo: Tirtirid File

Mamulka Geo sol


Tixraac Go'aan LR: 505/2023 kuna Tariikhaysan 15/11/2023 kana soo baxayda Guddida fulinta Dawlada hoose Ujeedaeeduna hayd Madax Bananayn File iyo Tirtirid File.

Hadab guddida fullinu waxay Go'aan sadeen in loo Madax Banaaneeyo Dhul Hal Block oo Danguud ah loo bixiyey Dayn kuna qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay **Maxamed Xasan Ibraahim file No18200**, sidoo kale la cancel gareeyo File-ka TR:21245 kuna qoran yahay Muwaadinka magaciisu yahay **Xamse Xasan Maxamed**, Cabirkiisuna dhan yahay 4(24X18M)

Sidaas darteed waxaa halkan idinku soo gudbinayaa File-ka la tirtirayo si aan u tirtirtaan looguna madax banaaneeyo File-ka kale ee u ku qoran yahay **Maxamed Xasan Ibraahim**.

Allaah Mahad Leh

Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Waxda Dhulka



MaxamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa

JAMHUURIYADA SOMALILAND
DAWLADDA HOOSE HARGEYSA
XAFIISKA MAYOR KU-XIGEENKA



REPUBLIC OF SOMALILAND
MUNICIPALITY OF HARGEYSA
DEPUTY MAYOR'S OFFICE

Date: 15-11-2023

Go'aan Lr: 505 /2023

Go'aan Guddi Fulineed:-

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fullinta Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay **15-11-2023**, Shir Gudoomiyena uu ka ahaa Ku Simaha Duqa Caasimadda Hargeysa, **Khadar Axmed Cumer (Khadar-Nuur)**, kuna saabsanayd **Madax Banaanayn file & tir tirid file**, Dood iyo falanqayn dheer kaDib:-

Guddida Fullintu:-

Markay Arkeen:

Sharciiga Maamulka Gobalada & Degmooyinka Jsl ee
Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen:

Tixraaca Go'aan-ka Sumadiisu tahay XDH/_/06, kuna Taariikhaysan **31-july-2006**, ujeedadiisuna ahayd Wargalin , Dayn kana soo Baxday Maayarkii hore ee Caasimadda **Xuseen Maxamuud Jiciir**.

Markay Ogaadeen:

Tixraaca Form No:191, kuna Taariikhaysan **18-09-2007** ujeedadiisuna ahayd Foomka dhul bixinta DHH Kana soo baxday Guddida farsamada ee wakhtigii Mayor Jiciir. Dhul Dan guud ah oo loo siiyay Muwaadinka Dayn laga qaaday oo ahaa khasnadaha waawayn ee lacagta oo dowladda hoose ka iibsatay ,looguna badalay Dhulkaa.

Markay Aqoonsadeen:

Tixraaca warbixinta Sumadeedu tahay DH/AGDHDHH/_120/ 2023, kuna Taariikhaysan **28-08-2023**, kana soo baxday Agaasimaha Waaxda Dhulka Dhh, ujeedadeeduna ahayd warbixin dhul dan guud ah.

Markay Tixgaliyeen:

Tallada Masuuliyiinta ay howshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadeen:-


Kadib markay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan Guddida Fullintu waxa ay Go'aansadeen in loo madax banaaneeyo 1 block- oo dan guud ah oo loo bixiyay dayn uu ku qoran yahay **Muwaadin Maxamed Xasan ibraahim** file: No:kiisuna yahay **18200** sidoo kale la Cancel gareeyo File ka Tr-kiisu yahay **21245** kuna qoran yahay **Xamse Xasan Maxamed**, loona celiyo Mulkiilayaaasha Beerta ilma Afloo dhulka cabirkiisu dhan 1 Block (48x90M) Dan Guud ah oo ka banaan beertooda Xal ahaan khilafka Awgii.

(Siciid Nuur Jaamac)
(Xoghayaha Fullinta D/Hoose/Ahna
Xoghayaha Golaha Deegaanka Harg



MAHAD LEH

(Khadar Axmed Cumar (Khadar-Nuur)
Ku-Simaha Duqa Caasimadda /Ahna
Gud- Xig- Golaha Deegaanka Hargeysa



Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_489/2023.

Date: -25/12/2023

KU: Mamulka Geo Sol

=Xarunta=

OG: Ku xigeenka duqa caasimada

=Xarunta=

OG: Xoghayaha dawlada hoose

=Xarunta=

OG: Duqa Caasimda Jsl

=Xarunta=

Ujeedo: Tirtirid File

Mamulka Geo sol


Tixraac Go'aan LR: 505/2023 kuna Tariikhaysan 15/11/2023 kana soo baxayda Guddida fulinta Dawlada hoose Ujeedaeeduna hayd Madax Banaanayn File iyo Tirtirid File.

Hadab guddida fullinu waxay Go'aan sadeen in loo Madax Banaaneeyo Dhul Hal Block oo Danguud ah loo bixiyey Dayn kuna qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay **Maxamed Xasan Ibraahim file No18200**, sidoo kale la cancel gareeyo File-ka TR:21245 kuna qoran yahy Muwaadinka magaciisu yahay **Xamse Xasan Maxamed**, Cabirkiisuna dhan yahay 4(24X18M)

Sidaas darteed waxaa halkan idinku soo gudbinayaa File-ka la tirtirayo si aan u tirtirtaan looguna madax banaaneeyo File-ka kale ee u ku qoran yahay **Maxamed Xasan Ibraahim**.

Allaah Mahad Leh

Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Waaxda Dhulka



Encl: MaxamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa



Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_ 120/2023.

Date: -28/08/2023

Ku:Duqa Caasimda Jsl
Og:Xogahayaha Fulinta Dawlada Hoose
Og:Kuxigeenka Duqa Caasimda Jsl

=Hargeysa=
=Hargeysa=
=Hargeysa=

Ujeedo: warbixin dhul dan guuda

Mudane Mayor

Waxaan halkan kugula wadaagayaa Warbixinta fayl dan guuda oo oo ku yaala degmada **IB/KOODBUR**, Gaar ahaan **BEERTA ILMA HIKUMED AFLOW**. Faylkan waxa ku qoran **MAXAMED XASAN IBRAAHIM**, waa fayl dhamaday sharcigiisuna uu dhanyahay dhaafayna xafiiksa mapka tariikhdu markay ahayd 5.5.2008.


Faylkan iminka marka laga hubiyay xafiiska mapka ku calaamadsana **DAN GUUD** iyo **C/NO** waana laga masaxay, mana cada cida khaladka gashay madama ay ka horaysay intii xafiiska la xidhay lana hubiyay xafiiska.

Wakhti xaadirkan goobtan waxa map ahaan iyo dhul ahaanba sharci u samaystay muwadin **XAMSE XASAN MAXAMED** lehna **TR:21245**, faylkan ayaa dhamaaday isagoo dhaafaya dhamaan cidkasta oo uu maro mareegta fayl sharciyayntu.

Sidoo kale **TR:21245** Intii uu socday waa laga hubiyay xafiiksa mapka taariikhdu markay ahayd **15.4.2023**, wakhtigaa xafiiska mapku waxa uu cadeeyay in ay ka madax banantahay **DAN GUUD**.

Mudane Mayor, case-kan waanu galanay gufi ahaan anagoo isu dhan taladaydu waxay tahay madama xafiiksa kaydka mapka ka dhacay khalad wayn oo hantidii hore sharciga loo haystay la masaxayo waa ahaan gufi ahaan u ogolaanay sharci faylka hore ee danta guuda ee tixraciisu kor ku xusnaynay inuu yahay ka sharciga ah maadama aanu jirin go,aano fulineed oo luga tiriney ama lagaga noqoday sharciyadiisa. Faylka danbe isna in loo raadiyo dhul maadama uu isna yahay fayl dhamaystiran oo sharciyay inga baxay.

Maxamed Yuusuf Ciislaan
Aggasimaha Waaxda Dhulka DHH



Mohamed Ali Hageysa hageysa@hargeisa.gov.org Hargeysa



Xafiiska Map-ka ee DHH

28/08/2023

Ref/XMDD/DH 100 /2023

KU: Agaasimaha Waaxda dhulka: D.H.H

UJ: Warbixin file danguud ah:

Mudane agasime waxan halkan kuugu soo gudbinaya file danguud ah kuna yaala degmada I/KOodbuur gaara ahaan beerta **ILMA MUUMED AFLO**, file kan waxa leh muwadinka magiciisu yahay **MAXAMED XASAN IBRAAHIM** file kan oo dhamaaday sharcigiisuna u dhanyahay dhaafayna xafiiska mapka taariikhdu marka ay ahayd 5/5/2008.

File kan wakhti xaadirkan goobtisa kuma calaamsana **DANGUUD** iyo **C/NO** midna waana ay ka masaxan tahay mana cada sabab looga masaxay iyo cida ka masaxday ama shaqadan qabatay.

Wakhti xaadir kan goobtan map ahaan waa qayb kamida u sharciyay santahay **XAMSE XASAN MAXAMED** lehna **TR-21245** file kan oo sifo sharci ah ku dhamaaday madama oo goobtan laga cidkasta oo qabilsanyd sii daynta iyo hubinta files ka.

TR-21245 file kan aya inta uu socday laga hubiyay xafiiska mapka tariikhdu marka ay ahayd 15/4/2023 waxana uu xafiisku cadeeyay inay ka madax banan tahay danguud madama oo goobta laga masaxay dantagood.

Mudane agasime file ka uu leeyahay muwadin **MAXAMED XASAN IBRAAHIN** lehna **CINO:47534** iyo **FINO:18200** ayaa ah file ka laga masaxay mapka.